



FOUNDATION
FOR BLACK
COMMUNITIES



Hogaamiyaha Codsiga

FIKRADAHA DADKA MADOW
DEEQAHA: DHIS OO ISKU XIDH

2023



Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund

| Canada

WAR KA BIXINTA HAY'ADAN (FOUNDATION)

Bulshooyinka dadka madow ayaa in badan codsanayey in lala yimaado hab-dhaqaalayn, [Hay'ada Bulshooyinka](#) dadka madow waxa loo abuuray inay taas fuliso hubisana jnay dadka madow iyo bulshooyin koodu hore u maraan kana mid ahaadaan tallada mustaqbal kooda.

Waxa la asaasay 2020 siday u bedesho horena u mariso danahooda, FFBC waa Hay'ada Waxtarka (Philanthropic foundation) ayay ka ga'an tahay inay Ururada ay leeyihii dadka madow, iyo kuwa taageera dadka madow iyo kuwa ay himiladoodu tahay hore marka dadka madow, inay helaan dhaqaalaha iyo kaabista ay u baahan yihiin siday hore u mar muuqda u gaadhi lahaayeen.

DEEQAH FIRADAH DADKA MADOW

Deeqaha fikradaha dadka madow: Dhis oo Isku-Xidh2023 waa mashruuc maalgelinees oo ah \$8.9 million oo loogu talo galay inuu soo dhoweeyo taagerana mashaariicda hore marka ah ee ay la yimaadaan bulshooyinka dadka madow ee ku nool Kanada. Wuxuu barnaamijkan bilowga ihi maal gelinayaa mashaariicda baahiyaha defdega ah ee Bulshada Madow, hor dhacna wuxuu noqonayaa inuu u gogol dhigo kuwa dambe.

Gunnada loo yaqaan Dhis oo Isku Xidh waxay bixinaysaa gunnad sanad qudha ah si kor ugu qaado tamarta iyo guusha ururada ay madaxda ka yihiin dadaka madow, iyo kuwa wac u qabta madowga ee samafalka ku shaqeeya iyo ururada ku hawlan ka hor taga midab kala sooca la soo dersa bulshada madowga sarena u qaada dhaqaalaha bulshada dadk madow.

Codsigu wuxuu furmayaa bisha December 18, 2023, waana in la soo ugu xereeyaa ugu dambayn bisha February 1, 2024 saacadu markay tahay 11:59

HABKAYAGA



FFFBC waa kii ugu horeeyey nociisa, ugeedadadayadu waxy tahay in la fahmo oo la aqoonsado lana soo dhoweeyo xalalka (solutions) bulshada madowga. Se marka hore waa inaynu la tashano bulshada siday inoogu tilmaaman talaabooyinka ugu haboon mustaqbalka. Waxaan u baahanahay codka iyo waayo aragnimada bulsho kasta oo madow. Lagama maarmaanka bulshado waa ta keentay in FFBC uu kafaala qaato habka loo yaqaan Habka Ka Qayb Qaadashada Gunnad Bixinta ee. Habkanu wuxuu salka hayaa aragtida odhanaysa inay dadku isku wada xidhan yihiin oo hore u mar qofku wuxuu ku gaadhayaa markuu danta dadka iyo tiisa isku wado.

Habkanu wuxuu culays saaraya aqoonta, waaya aragtinimada, fikrad abuurka, iyo aragtida dadka ugu dhow guulaha laga filanayo barnaamij yadan. Codsiyada oo dhan waxa falanqay doona dad ka tirsan bulshada dadka madow oo ay ku jiraan kuwii soo cadsaday. Habka Ka Qayb Qaadashada Gunnad Bixinta ee wuxuu culayska saarayaa is aaminaada, cadaalada iyo kalsoonida, FFBC habakanay ku dhaqantaa si u abuurto deeq-bixin dimuqradiyad (Democracy) ku tiirsan.

Intaa waxa dheer inuu habka FFBC ka war qabo taariikhda taageerada bulshada qaarkood ay la soo deristo waxyaabo wiiqaya cadaalad cimileeda, cadaalada laxaad la'anta iyo cadaalada ay uga siman yihiin lab iyo dhedigba. Kuwaa waxa ka mid ah bulshada 2SLGBTQI+, dumarka iyo habbla, bulshada loo yaqaan labeebka, dadka dhaqaalahoodu hooseeyo, dadka laxaadka la', kuwa dhegaha la', dhowaan soo galka, qaxooytigaa, kuwa jeelka ka soo baxay iyo nolol-maalmeedku ku adag yahay. Waxa FFBC da ka go'an inay taageerto hab kasta oo saamaynaya koox kasta ee aan dulmi ku sal lahayn, doonayna inay cid isticmaarsadaan ee ku fadhiya cadaalad, wax wada qabsi sidii loo dhisi lahaa nolol wacan oo ay bulsho kasta oo madow ku noolaan lahayd.


Bulshada ayaa war gelisay barnaamijka Gunnada Isku-Xidh oo Dhis. Waanu ognahay inuu habkanu yahay mid soo noqnoqanaya, waananu ku han weynahay sidii loo dhisi lahaa mustaqbalka habab gunadayn dhawr sano ah oo kanu u hormood u noqon doono.



UQALANKA

Ururada u Qalma

Ururada u qalma oo qudha ayaa ka qay geli kara mashruucan Isku-Xidhn oo Dhis, kuwaasuna waa kuwa:

- ✓ Inaad yahay urur ay maamulaan dad madow, ujeedadiisu ay tahay danaha dadka madow una heelanu adeega dadka madow (B3).1. Taasi waxay inau madaxda sare ururku intooda badan ay yihiin dad madow. Inay ujeedada ugu weyn ee ururku ay tahay taageerada iyo ka qayb gelista madowga iyo inay hawlahaa ururku intooda badani ay wax u qabtaan dadka madow.
 - ✓ Inaad tahay urur samafal ah oo diwaan gashan, urur bilaa macaash (nonprofit) oo diwaan gashan, kuwa kale ee samafalka bixiya, urur aan diwaan gashanayn oo macaash laga rabin (unicorporated non-profit) ama [koox la shaqaysa shuraake diwaan gashan](#). Kooxaha aan diwaan gashanayn waxa ka mid noqon kara Iskaashatooyinka dadk madow, ururada dhalin yarta (student unions), Kooxaha Affinity iwm.
 - ✓ Inaad ku nooshahay Kanada.
- 

Fikradaha U Qalma

Goortaa buuxinaysid foomka codsiga ayaad ku sheegi doontaa aragtidaada. Fikradaha loo arko inay u qalmaan gunnadayntan oo quudha aaya la maal gelin doonaa.

- ✓ **La imow ugu yaraan mid ka mid ah sadexda ujeedo (B3) ee mashruuca Isku-Xidh oo Dhis sida:** Ka hor taga midab kala sooca, hore u marinta bulshada iyo kobcinta dhaalaha bulshada.
- ✓ **U hawlanow mid ama laba oo ka mid ah Ujeedooyinka Hore Marinta Riiqda Dheer ([Sustainable Development Goals](#)), iyo Bar [Tilmaanada Hore Marka Caafimaadka](#).**
- ✓ **Hawlahan waxa la suurto gelin karaa goorta ku qeexan mashruucan iyo** goorta la helo gunnadayntan, goorta la hubiyo inay gunadanu lagu takri falo inta ka horeysa Bisha March 31 keeda 2025.
- ✓ **Taas oo la hubinayo inaanay cidda u qalmin aanay ka faaidaisan, sida kuwa hoos ku qqexani.**
- ✓ **Ururada aan diwaan gashanayni ee doonayn macash, ururada iskaashatooyinka iyo kooxaha kale.**
Ururada u shaqaysta ayagoon raadina macash, iskaashatooyinka iyo kuwa kaleba waa inay la shuraakoobaan ururada kake ee doonayn inay macaashaan iyo hay'adaha kale ee samafalka ku shaqeeya siday u helaan gunnadaynta FFBC. Haduu ururkaagu aanu keeni karin shuraake diwaan gashan goorta aad gudbinaysid codsigaaga, waanu kuu dhaafi karnaa oo waxaanu kugu talinaynaa inaad noo soo gudbiso codsadaasha. Waaanu kuu sheegaynaa inuu mashruuca FFBC ay kaa dooni doonto heshsiiga ay isla gaadheen kooxdan aan diwaan gashanayn iyo ururka kula jira ee aan diwaan gashanayn, heshiiskaas oo qeexaya faah faanida iyo u jeedada wada shaqayn tan.

Siday u helaan maal gelintan, waxa looga baahan yahay ururada aan diwaan gashan, iskaashatooyinka iyo kooxaha kale inay yeeshaan shuraake diwaan gashan inta ka horeysa bisha February 1, 2024. Haddii aad doonaysid inaad war bixin dheeraad ka ogaatid arrintan waxaad la xidhiidhaa fund@forblackcommunities.org.

Ururada aan u qalmin mashruucan

Ururadanu ma heli karaan gunnadaha mashruucan:

- ✖ Ururada aanay madax ka ahayn dad ka soo jeeda bulshada dadka madow, kuwa aanay ahayn ujeedadoodu danaha dadka madow, iyo kuwa u adeega dadka madow.
- ✖ Ururada iyo shirkadaha raadinaya inay ka macaashaan hawla hooda.
- ✖ Kuwa iskood u hawl gelaya (Individuals)
- ✖ Ururada baayac mushtariga oo ay ka mid yihiin ururada baayac mushtariga, xarumaha caafimaadka, iskuulada, iskuulada gaarka loo leeyahay, jaamacadaha, kolejooyinka, qaybaha caafimaadka, waaxaha caafimaadka dawladaha, ururada wax barashada, iyo kuwa fidiya hawlaha caafimaadka iyo adeegyada bulshada.
- ✖ Dawladaha hoose iyo cid kasta oo hoos yimaada tallada dawladaha hoose, oo ay ka mid yihiin dawladaha hoose, dawlad goboleedada iyo degmooyinka.
- ✖ Ururada ay hawshoodu ku kooban tahay arrimaha siyaasada oo ay ku taageerayaan ama ka ka hor jeedaan xisbi siyaasadeed, ama xil dhibaan la doortay ama qof isu soo taagay in loo doorto xil dawladeed.



Hawlaha aan u qalmin maal gelin

Hawlahan hoos ku tilmaaman uma qalmaan gunadaha mashruuca FFBC:

- ✖ Maal gelinta misaaniyad dhiman
- ✖ Gadashada ama iibka khamrada, xashiishada, maal gelinta liisadaas oo kale, dayac tirka goobaha lagu iibyo khamrada ama xashiidada.
- ✖ Hawlaha ku lug leh arrimaha siyaasada oo ay ka mid tahay taageerada ama ka hor imidka xisbi urur siyaasadeed, xil dhibaan la soo doortay ama qof isu soo taagay in loo doorto xil dawladeed.
- ✖ Hawlo ku lug leh arrimo la xidhiidha diinta ama ku taliya inuu qofku ka qayb qaato kuwaas oo kale, waxa ka mid ah inay kaniisad maamushaa xarun bulsho oo cunto u fidisa gargaar dadka ku nool meesha, oo ay soo codsataa in laga gargaaro dhaqaalahu ku baxaya hawlahaas.Taas loo arki maayo hawlo ku lug leh diinta.
- ✖ Kharashka ku baxa dayac tirka goobaha loo isticmaalo arrimaha diinta.
- ✖ Ololayaasha lagu doonayo kobcinta dhaqalaaha.
- ✖ Barnaamijyada, hawlaha iyo adeegyada aan wax tar u lahayn bulshada dadka madow.
- ✖ Barnaamijyada, hawlaha iyo adeegyada laga fuliyo dibedda Kanada.
- ✖ Hawlaha la dhamays tiray intii ka horeysey soo ban dhiga barnaamijka FFBC.





DHAQAALAYNTA BULSHADA DADKA MADOW

Hababka Dhaqaalaynta

Habka This oo Isku Xidh ayaa ka gudoomi doona ururada ulqalma mashruuca B3 codsiyadooda.

Xiliyo kala duwan ayaa laga aqbali doonaa codsiyadaa lagu fulinayo mashaaricda iyo barnaamijyada waxtarka u bulshada madow. Wxa jira sadex hab dhaqaalayn. Waxaanu kaa codsanaynaa inaad dooratid habka uju haboon hawlahay aydin qabataan iyo ujeedooyin kiina.



Habka asaaska ah oo ay gunnadu gaadhaysa \$40,000 oo daboolaya hawlahay ka baxsan brnaamlijka;



Catapult Stream Gunnada oo ah \$40,000 - \$100,000;



Habka Dhaqaalaynta Bulshada Gunnada oo gaadhaysa \$250,000 oo lagu maal gelinayo mashaaricda weyn iyo hab-dhiska bulshada.



Habka Asaaska Ah | \$40,000

Hawlaha lagu fulinayo baahiyaha aan ku lug lahayn ee ka baxsan barnaamijka

Waxay codsan karaan Ururada iyo kooxahuba gunnadayn gaadhaysa \$40,000 si ay u daboolaan baahidooda.

Habkanu wuxu maal gelinaya hawlaha asaasiga ah ee lagu gaadhayo guusha himilada ururka ama kooxda.

Waxay codsan karaan kharashka ku baxaya shaqaalaha iyo hawlaha maaulka ee aan la xidhiidhin barnaamijka.



Tusaale

- Uurur ah B3 ayaa codsanaya kharashka ku baxaya shaqaale cusub oo fulinaya hawlaha barnaamija taageera bulshada Madow.
- Koox dhalin yaro ah ayaa codsaday gunnad daboosha kharashka la taliye ay u baahan yihiiin siduu ugala taliyo siday wax u maamuli lahaayeen.
- Urur ah B3 ayaa codsaday gunnad daboosha musharka shaqaale fuliya hawlaha barnaamijka.
- Hay'ad samafal ah ayaa codsaday in laga bixiyo kharashka ku baxaya qalab xafiis-Kuraasi oo uu baahan yahay xifiiskooda cusubi.
- Urur B3 ayaa iibsaday qalab teknooligi ah iyo iyo qalab kombuter iyo soo raaci sii



Habka Dhexe | \$40,000 to \$100,000

Maal gashiga fikradaha cusub ama balaadhinta barnaamijyo ama adeegyo.

Ururada ama kooxaha u qalmaa ayaa codsan kara gunnad gaadhaysa \$40,000-\$100,000 si u baadhaan habab cusub amba qaar imika jira sidii hore loogu marin lahaa danaha iyo adeegyaga bulshada dadka Madow. Waxa ka mid ah cilimi-baadhistaa, muqaalin (design), Hor Kac (piloting) iyo qiimaynta fikradaha.



- **Fikradaha iyo Hababka Cusub:** Ururada ama kooxaha bilaabaya ama dhisayaa barnaamijyo ama adeegyo ayaa soo codsan kara \$40,000 - \$75,000
- **Fikradaha iyo Hababka Cusub:** Ururada ama kooxaha bilaabaya ama dhisayaa barnaamijyo ama adeegyo ayaa soo codsan kara \$40,000 - \$75,000

Tusaale

- Urur samafale ah ayaa doonaya inuu iibsado qaboojiye uu u baahan yahay oo la dhigi doono koox cusub oo ku hawlan wax kariska.
- Urur aan loogu talo gelin macaash (non-profit) oo ku hawlan dhawr barnaamij iyo deegyo ayaa raba inuu soo ban dhigo fiidyo (video) heer sara ah, kaas oo ku lug leh wada xidhiidhka.
- Ururka samafalka cuntada (food bank) ayaa doonaya inay xaruntooda dayac tiraan iyo inay iibsadaan gaadhi daboola baahiyaha dadk waaweyn.
- Hoyga-dadka dibed ku noolka ah (shelter) ayyu baahan inay dhalinyarada ku nool hoygaa in loo iibiyoo koodhka dhaxanta.
- Urur B3 ah ayaa doonaya inuu diraasad suurto-gal oo ku lug leh xarun cusub oo dhalinyara bulshada u fidiya adeegyo madadaalo (recreation)
- Urur bulsho oo ah B3 ayaa bilaabay diraasad cilmiyeysan oo u lug leh shaqaalaha Madow ee socdaalka ah.
- Uurur u hawlahan bulshada ayaa ku talo jira sidii loo qiimayn lahaa barnaamij jira.
- Koox ka kooban waalidka dadka madow ayaa inay dersaan sidii loo abuuri lahaa urur samafal ah oo xagga cuntada ka taageera duqaytida madow ee ku nool bulshada.

Habka Dhexe| up to \$250,000

Maal gelinta mashaariicda waaweyn iyo hawlaha guud (capital projects and social infrastructure)

Ururada kooxaha u qalma gunnadaynta ee filarado weyn oo hormariya arrimaha dhaqaalaha bulshada Madowga. Waxay soo codsan karaan gunnad gaadhi karta \$250,000 siday u kobciyaan barnaamijiyada, adeegyada iyo lacagaynta fikradooda. Gunnada waxa loogu talo galay in la maal gelio ururada lagama maar maanka bulshada, wax ku kordhiya xoojinta habka cimilada ee saameeya bulshada Madowga, dhagaxa horena u dhiga siduu isbedel qiime leh loo gaadho.

Gunnadanu waxa loogu talo galay baahida bulasada iyo hawlaha guud (physical infrastructure) ee wuxtarka u leh bulshada Madowga, hadday guud ahaan wadanka oo dhan iyo gobolada (ugu yaraan laba gobol). Waxa laga rabaa ururada inay muujiyaan inay la kaashadeen deraasad, baahiyi, qiimaynta baahida iyo habab kale la mid ah siday u muujiyaan inuu habkoodu suurto gal yahay, la balaadhin/yarayn karo iyo inuu noqon karo hab mar dambe la qaadan karo.



Codsadayaashu waa inay keenaan cadaynta dhaqaalaha (financial statements), misaaniyad sanadeedka ay ku shaqay nayeen (annual operating budget) ee labadii sanadood ee ugu dambeeyey iyo wax cadaynaya inay hawlhoodu u socdeen si wacan.

Tusaale

- Urur ku tilmaaman B3 ayaa soo codsaday dhaqaale ay ku fuliyaan hab ay doonayaan inay ku aburaan xarun loogu talo galay dadka Madow ee duqaytida ah ee u baahan xanaanayn jooto ah.
- Urur u adeega bulshada ayaa soo codsaday gunad/dhaqaale ay ku suurto geliyaan sidii loo abuuri laha guryo ay goyn karaan dadka dhaqaloohoodu hooseeyo.
- Kooxo ururo ah oo adeega arrimaha saameeya dumarka ayaa dhaqaale u doonaya inay dayac tiraan oo ay dib-u-habay ku sameeyaan xarun keenta hab isugu jira farsamooyin dhowr ah oo taakuleeya dadka ka soo nabad galay dhibaatooyinka tahriibta.
- Urur B3 ah ayaa u fidiya teegero dadka socotada iyo qaxootiga ah siday u helaan hab-maamul wanaagsan iyo cadaalad-abuuris.
- Kooxo Madow ooisugu jira beralay iyo soo saarayal (producers) ayaa ku talo jira inay iiibsadaan/gataan qalab ay wadagaan siday u kobciyaan cunto-soo saar kooda, isku filaan u gaadhaan iyo inay aburaan xarumo cunto dhaqaloohooda kor u qaada.
- Urur samafal (non-profit) oo ka hawl gala bulshadamiyiga iyo woqooyiga (northern communities) ayaa dhagax dhigay iskaashato ka dhexeysa baayac mushtari ka kooban dadka Madow, maayac mushtariga soo koraya iyo kuwa iskood u shaqaysta.

HABKA KALA SAARKA

Waxa dhamaan codsiyada ka yimaada ururada u qalama eegi oo kala dooran doona xubno ka tirsan bulshada dadka Madow. Ururada u qalma waxa ka mid ah ururada ay maamulaan dad Madow, kuwa dar yeela himilooyinka dadka madow, iyo kuwa u fidiya hawlo samafal ah ee ka hawl gala Kanada. Ururada dhamaantood wax la war gelin doonaa bisha March 2024 waxa laga gaadhat codsigoodii.

Kooxaha kala saarka ee bulshada

Kooxo ka tirsan bulshada ayaa kala saari doona codsiyaasha, ayagoo isla markaana u gudbin doona hogaanka FFBC taalada iyo ciday doorteen oo ay door bideen. Kooxaha-kala-saarku waxay ka kooban yihiin 50% ka yimid codsadaayaasha iyo 50% laga soo doortay dad weynaha bulshada. Waxa Codsadayaasha u furan inay codsigooda ku sheegaan inay ogol yihiin inay ka mid noqdaan Kooxaha Bulshada ee Kala Saarka. Habkan dhiiri gelinaya inuu qof kastaa ka qayb qaato hawlahay ayay u jeedadisiis tahay inuu bulshada isku xidho, dhaqaaleeyo barnaamijiyada iyo hogamiyaasha ku dadalaaya inay wax la qabtaan bulshada u baahan taakulayn, hantiyaan kalsoonida bulshada iyo inay taageeraan cid kasta oo doonaysa inay bulashada dadka Madow hore u maraan.

Shuruudaha kala saarka

Go'aan kasta oo la gaadhaa wuxu salka ku hayaa siduu ururku iyo aragtidiisu ugu qalanto qiimaynta B3 ee saamaysa ururada:

- Shuuraha u qalanka waxaad fulin kartaa goorta aad fulisid
 - Adoo u heegan inaad ka qayb qaadato mid ka mid ah sadexda ujeedooyin.
 - Adoo ka hawl gaala mid iyo wixii ka badan ee ku lug leh Ujeedooyinka Hor marka riiqda dheer (Sustainable Development Goals and Social Determinants of Health)
 - Inaad hubisid inuu mashruucu ku fulayo gunadii loogu talo galay iyo inuu ku dhamaanayo mudadii loo qoon deeyey.
 - Inaanay ku dhex jirin hawlihi loo arkay inaanay u qalmin maal gelintan.
- Inuu wax tar u leeyahay bulshada dadka Madow ee ku nool Kanada.



QODABADA LOO BAAHAN YAHAY INAY KA MID NOQDAAN WAR BIXINTA

(Reporting Requirements)

Waxa lga rabaa ururada loo ansixiyey in la maal geliyo inay saxeexaan Heshiiska Maal Gelinta inta aan la siin gunnada. Sida ku qeexan heshiiska maal gelinta, waxa laga filayaa ururada gunnadahan helay inay waajib ku tahay inay qayb ka noqdaan habka lagu soo gudbinayo war bixin laba goorood sannadkii. Ujeedayadu waxay tahay sidaan aqoon uga korodhsan lahyn ururada hela maal gashigayaga, sidaan u dhisi lahayn wada tashi, sidaan u abburi lahayn iskaashatooyin guuleysta, sidaan u teegeri lahayn bulshada iyo sidaan habkan uga dhigi lahayn hab wax tar leh oo marar dhawr ah laga faaidaysan karo.

1

Dib u eegid kooban: Inta lagu guda jiro arrimaha codsiga ururka, shaqaalahaa FFBC waxay la xidhiidhi doonaan codsadaha siday meel u dhigaan waxa soo kordhay, dhibaatooyinka ka hor iman kara iyo guulaha ay ilaa hadda gaadheen. Faalaqantan inteeda badan waxa lagu fulin doonaa qaabka is araga aan la wada joogin (Virtually via video conference and phone contacts).

2

War Bixinta Kama Dambaysta Ah: Goorta uu hawl galkanu uu dhamaado sidii loogu talo galay, oo aan ka dambayn 31 bisha March 2025, waxa laga codsan doonaa ururadii maal gelinta helay inay soo gudbiyaan war bixn kama dambayn ah oo wax ka sheegaya hawlaha ay qabteen iyo guulaha ay gaadheen.



War bixin kasta oo laga soo dhex saaray qoraaladan ayaa lala wadaagi karaa Dawlada Kanada ama loo adeegsan karaa hawlaha iyo u jeedooyinka Hay'ada Bulshooyinka dadka Madow. Bal se ogow in aanay FFBC la wadaagi doonin Dawlada Kanada war bixin kasta oo gaar ah.

HABKAAD U CODSAN LAHAYD

Waxaanu kaa codsanaynaa inaad, goortaad is tidhaa inaad diyaar u tahay, inaad codsigaaga noogu soo gudbisid adoo ka hawl gelaya Goobtayada Intarnetka (Online application Portal). Wuxuu codsigaagu u dhigmi doonaa habab waafaqsan Goobta Onternetka, waxa kale oo intaa dheer oo aanu kugula talin lahayn inaad isu soo ururiso war bixin kasta iyo warqad kasta oo aad is leedahay wax tar bay u leedahay codsigaaga. Intaa waxa dheer inaanu kugu dhiiri gelinayno inaad kopy kala hadho qoraal, cadayn iyo wada hadal kasta oo aad istidhaah wax tar buu yeelan karaa.

Inta lagu guda jiro codsiga waxa lagu soo weydiin doonaa inaad dib u eegto oo aad hubiso qdob kasta oo aad soo sheegatay si loogu maal geliyo. Dib u eegista arrimahan aad ku sheegatay codsigaagu wuxuu hawl yaranayaan kuuna qeexayaa qdobada lagu wada heshiyey.

Foomka codsigan waxa la helayaa isagoo ku qoran af Faransiiska iyo Ingrisiga.

Waxa kooban goobaha loogu ogol yahay inuu codsaduhu uu codsigiisa uu dhameeyo telefoonka. Haddii aad is leedahay habkaasayaad u baahan tahay waa inaad samaysaa siday taasi u suurta lahayd la xidhiidh goobta ([link](#)), haddii kale waxaad luminaysaa baadhista codsigaaga. Meelaha taas laga suurto gelinayaa waxay furmayaan inta u dhxeysa **Bisha January 8 iyo 19 keeda, 2024**.


Haddii ay kuu suurto geli weydo inaad codsiga noogu soo dirto Goobta Internetka ([portal](#)), waxaanu kaa codsanaynaa inaad la xidhiidh shaqaalah FFBC oo halkan kala xidhiidh fund@for black communities.org inta ka horeysa mudada loo cayimay in uu xhidhmo aqalaada codsiga. Waanu ku taageri doonaa inta aanu kari karno.

Aqbalaada codsiyadu waxay bilaabmayaan December 18, 2023, waxaanay xidhmayaan bisha February 1, 2024. Saacadu goorta ay tahay 11:59 PM PT.

CODSO HADDA



WAQTIYADA





NALA SOO XIDHIIDH

Haddii aadsua'ala qabtid waxaad nagala soo xidhiidhaa
fund@forblackcommunities.org/ [link](#).

Hadaad doonaysid xidhiika telefoonka waxaad nagala soo
xidhiidhaa **1.833.44BLACK (442-5225)**.

AQOONSI

Gunnada Isku xidh oo Dhis waxa taageera dawlada
Kanada iyo Ururka samafalka Lucie & Andre Chagnon.

Funded in part by the
Government of Canada's Black-Led
Philanthropic Endowment Fund | 